


# Kalaay waxay la hadashaa dhirta

- Ursula Nafula
- Jesse Pietersen
- Abdi Muse
- 2
- Soomaali




Tani waa Kalaay. Waxay jirtaa toddoba sano.  
Magaceeda macnihiiisa waa “midda  
wanaagsan” luqaddeeda, Lubukusu.




Kalaay way soo toostaa waxeyna lahadashaa geedka liinta ah. “Fadlan geedka liinta ahoow, weynoow oo na sii liin badan oo bissil.”



Kalaay waxay aadaa dugsiga. Jidka waxay kula hadashaa cawska. "Fadlan caws, weynoow cagaaro oo ha qallalin."




Kalaay waxay soo martaa ubaxyo duureed.  
“Fadlan ubaxyo, sii magoola, si aan timaheyga  
idiin saarto.”



Iskuulka, Kalaay waxay la hadashaa geedka dhexda xerada ku yaallo. “Fadlan geed, so saar laamo waaweyn si aan ugu akhrisano hooskaada.”



Kalaay waxay la hadashaa bowdka ku wareegsan dugsigeeda. "Fadlan u kora si awoodleh oo joojiya soogallida dadka xun."



Markay Kalaay guriga ku laabato, waxay  
booqataa geedka liinta." Miyay bislaadeen  
midhahaada wali?" Ayey weydisaa Khalaay.



"Liinta weli waa cagaar," ayay ku neef tuurtay Kalaay "Waxaan ku arki doonaa berrito geedka liintaw," ayay tidhi Khalaay. "Malah markaas baad ii yeelan doonto midho liin ah oo bislaaday!"



# Global Storybooks

[globalstorybooks.net](http://globalstorybooks.net)

**Kalaay waxay la hadashaa dhirta**

✍ Ursula Nafula  
☞ Jesse Pietersen  
☞ Abdi Muse

